



# Kulanka Isu Duwaha Guud ee Onlaynka ah

December 4, 2023

# Soo dhoweyn & Ajandaha

- Wax ka ogow ujeedka Saint Paul Public Schools, tirakoobyada bulshadeenna, iskoollada, shaqaalaynta iyo isbeddellada xagga isqorista
- Hindisaha *SPPS Achieves* oo ah Qorshe Istaraatiijiyadeed iyo Qorshaha Samatabbixinta Maraykanka (American Rescue Plan).
- Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeed ee 24 (sannadkan) iyo saadaasha Sannad-Maaliyadeed ee 25 (sannadka soo socda)
- Waxyaalaha mudnaanta waxbarasho u ah bulshada: Taladii aynu dhankiinna ka helnay iyo ka qaybgalka kulamadii wadahadallada
- Tallaabooyinka xiga ee abuuridda miisaaniyadda sanadka soo socda iyo caqabadaha inaga horreeya
- **Wakhtiga su'aalaha waa dhammaadka kulankan**

# Ku Saabsan Degmada Saint Paul Public Schools


## Hiigsiga

in lagu dhiirri-geliyo ardayda inay noq oo raadiyo himiladooda isla markaana wax ka beddelo.


## Macluumaad shakhsi ahaa

33,110 arday (2022-23)

- 78% ardayda midabka leh
- 71% waxay u qalmaan qadada bilaashka ah
- 28% Bartayaasha luuqadda Ingiriisiga
- 17% waxay u qalmaan adeegyada waxbaras



# Ku Saabsan Iskooladeena



## 68 ISKOOLLO

Iskoollada Xaafadha ku Yaalla

Barnaamijyada wax lagu Dhigto Luuqado kale

STEM/Sayniska

Montessori

Farshaxanka & Muusikada

Waxbarashada Gaarka ah

Iskool ka Duwan Kuwa Caadiga ah

Carruurnimada hore

# Is-beddellada Diiwaangelinta

Sannad Dugsiyeedka	Tirada Ardayda Qoran October 1 (PreK-12)	Hoos-u-dhaca Tirada Ardayda Isqortay
2018-19	38,065	--
2019-20	37,010	-1,055
2020-21	35,715	-1,295
2021-22	34,185	-1,530
2022-23	33,110	-1,075
2023-24*	32,789	-321

\*Tirada ardayda isqortay 2023-24 weli ma ahan mid rasmi ah illaa la gaarayo bisha January 2024

- Degmada iskool labaad ee ugu weyn Minnesota
- 60% dadka gaaray da'da iskoolka ee ku nool St. Paul waxay dhigtaan Saint Paul Public Schools
- 85% ardayda SPPS waxay iskoollada degmadda ku jiraan hal fasal ilaa kan xiga
- Tirada ardayda isqortay waxaa ka muuqato inay xasilayso sannad-dugsiyeedka 2023-24

# Himilada SPPS Achieves Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Himilada SPPS Achieves (SPPS Achieves Strategic Plan)

## Natiijooyinka Muddada Dheer ee Ardayda:

1. In la isku soo dhaweeyo farqiga aqoonta ardayda ee isir walba, qowmiyad walba, dhaqan walba, iyo aqoonsigooda shakhsi ahaaneed
2. In la kordhiyo guushooda ku aaddan barashada af Ingiriisiga
3. In la kordhiyo guusha tacliin ee ardayda helo adeegyada barnaamijka waxbarashada gaarka ah

4. Hagaajinta u diyaargarowga fasalka kindergarten
5. In la kordhiyo koboca aqoonta tacliimeed ee wax-akhriska iyo xisaabta ee ardayda oo dhan
6. In ardayda qalinjebisa loo diyaariyo kulleeyada, shaqooyin xirfadeysan, iyo mustaqbalkooda

### Sinnaanta Habdhiska Nidaamka

#### Ujeeddo 1aad:

Aqoonso oo wax ka qabo sinnaan la'aanta heer hay'ad iyo nidaam

#### Hindisaha Istiraatiijiyadeed:

**1.1)** Horumarinta iyo hirgelinta nidaam ah Qorshe Sinnaan sida lagu qeexay xeerka guddiga ee Board Policy 101.00

### Dhaqanka Dugsiga iyo Degmada oo Wanaagsanaado

#### Ujeeddo 2aad:

Abuur iskool iyo dhaqan degmo oo dadkoo dhan ay ka wada muuqdaan

#### Hindisaha Istiraatiijiyadeed:

**2.1)** Hirgelinta barnaamijka waxbarasho ee xag shucuur ee Social Emotional Learning (SEL) kaasoo u cuntamaya dhaqanka ardayda heer degmo isla markaana la jaan qaadi karo barnaamijka hagaajinta hab-dhaqanka ee Positive Behavioral Intervention & Supports (PBIS)

### Waxbarasho Wax ku ool ah oo Tixgelineysa Dhaqamada Ardeyda

#### Ujeeddo 3aad:

Kordhinta awooddeena si loo haqabtiro baahiyaha waxbarasho ee arday walba

#### Hindisaha Istiraatiijiyadeed:

- 3.1)** Hirgelinta barnaamij waxbarasho kaasoo u cuntamaya dhaqanka ardayda heer degmo
- 3.2)** Xaqiijinta in dhammaan ardayda ay helaan waxbarasho ah sayniska, taariikh iyo juquraafi, farshaxanka, caafimaadka, iyo waxbarashada jir-dhiska
- 3.3)** Hirgelinta qaab dugsiga dhexe wax loo baro oo ah degmada oo dhan
- 3.4)** Wax ka qabashada caqabadaha horumarka tacliimeed ee ka dhashay saf-markii COVID-19

### U Diyaarsanaanta Kolleejada iyo Shaqada Xirfadeysan

#### Ujeeddo 4aad:

Kordhinta fursadaha ardayda ee ku aaddan inay arkaan nooca mustaqbal ee sugayo, in ay sahamiyaan shaqada xirfadaysan, iyo u diyaargarowga waxbarashada dugsiga sare ka dib

#### Hindisaha Istiraatiijiyadeed:

**4.1)** Xoojinta manhajka kolleejada iyo shaqada xirfadaysan, waxbaridda, waddooyinka shaqo, iyo dejinta qorsheynta shaqsiyeed

### Qiimaynta Barnaamijka/Qeybinta a Kheyraadka

#### Ujeeddo 5aad:

Qoondeynta kheyraadka iyadoo lagu saleynayo waxtarka barnaamijka iyo mudnaanta xarunta

#### Hindisaha Istiraatiijiyadeed:

- 5.1)** Hirgelinta nidaam si joogto ah lagu qiimeeyo waxtarka uu leeyahay barnaamij
- 5.2)** In si istiraatiiji ah loo qoondeeyo kheyraadka iyadoo la sameynayo miisaaniyad ku saleysan mudnaan
- 5.3)** Iswaafajinta iskoollada iyo adeegyada barnaamijyada kobciyo ardayda.

### La Shaqeynta Qoyska iyo Bulshada

#### Ujeeddada 6aad:

Hagaajinta ka-qaybgalka daneeyayaasha wixii ku saabsan go'aamada degmada

#### Hindisaha Istiraatiijiyadeed:

**6.1)** Hirgelinta qorshe iyo istiraatiijiyado si dhab ah uga tarjumayo ka-qaybgalka bulshada

# Qorshaha Samatabixinta Mareykanka

Goobaha Diiradda lagu Saarayo Himilada SPPS Achieves



**\$ 206.9 milyan**  
Waxay dhammaanaysaa  
September 2024

Saamaynta (2022-23)



**66**  
xeelado



**13,912**  
ardayda sida tooska ah loogu adeegay




**1,830**  
shaqaalaha la tababaray



**112**  
wadashaqeynta bulshada


Goobaha



# Dulmarka Miisaaniyadda SPPS

## DAKHLIGA

Xaggee ka Timaaddaa Lacagta?



+

**\$53.8 MILYAN**

Wadarta dakhliga cusub ee gobolka



-

**\$88.2 MILYAN**

Maalgashiga guud iyo isku dheellitirka kharashyada



=

**-\$34.4 MILYAN**

Waa lacagta ay SPPS kala bixi doonto lacagteeda keydka ah ee maaliyadda sannad-dusiyeedka 2024 (FY24) si ay u kabto barnaamijyada hadda socdo iyo caawinta barnaamijyadaas

## Miisaaniyadda

### Sannad-Maaliyadeed ee 2024

(sannad-dugsiyeedka hadda socdo)

**\$1,020,835,728**

## Miisaaniyadda

### Sannad-Maaliyadeed ee 2025

(sannad-dugsiyeedka 2024-25)

Iyadoo ay naga dhammaatay lacagaha ARP iyo kharashaadka hadda na galay iyadoo aysan jirin lacag loo qoondeeyay, degmada SPPS waxay qorsheyneysaa hoos u dhac miisaaniyadeed oo dhan **\$150.3 milyan**



# Faahfaahinta Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeeka 2024 ee SPPS

## Tusaalaha Qoondoynta Miisaaniyadda

Dugsi Sare A: \$14 milyan


Dugsi Dhexe B: \$7 milyan

Dugsi Hoose C: \$4 milyan


Bedqabka iyo Amniga: \$5 Milyan

Gaadiidka: \$35 milyan


76% oo kharashkeenna ah waxay ku baxaan adeegyada iyo barnaamijyada ardayda



Barnaamijyada iyo Adeegyada Ardayda



Hawlaha Dayactirka, Qalabka iyo Kharashka kale ee Miisaaniyadda Sannadka



Adeegyada Taageeridda Maamulka

Mushahaarka shaqaalaha iyo dheefahooda waxay ka dhigan yihiin **80% meesha ay kharashaadka ku baxaan**

# Dulmarka Shaqaalaha SPPS

- Degmadan waa mid ka mid ah kuwa ugu shaqaalaha badan St. Paul
- Qiyaastii 6,160 shaqaale saacado buuxa shaqeeyo iyo kuwo ah saacdo aan buuxin
- 54% dhammaan shaqaalaha waa macallimiin leysin heysta, 11% waa macallin kalkaal (TAs) iyo 8% oo ah waxbarasho kalkaal (EAs)
- Iskool walbaa wuxuu leeyahay maamule, karraani, macallimiin iyo shaqaalaha taageero waxbarashada (EAs, TAs, lataliyayaasha, shaqaalaha caafimaadka, shaqaalaha nafaqada, kuwa nadiifinta, iwm.)
- Shaqaalaha heerka degmada waxay taageeraan waaxaha shaqaaleynta, adeegyada maaliyadeed, la shaqeynta qoyska, xafiiska isgaarsiinta, waaxda tacliinta, tikniyoolajiyadda, iyo in kaloo badan
- Heerarka shaqaale ayaa kordhay 2.3% isla muddo ay isdiiwaangelinta ardaydu hoos u dhacday 16.4% (2014-2023)

# Faahfaahinta Shaqaalaha

- Inta badan shaqaalaha waxaa metelo mid ka mid ah 27 kooxood oo u doodo xuquuqda mushahaarka shaqaalaha
- Shaqaalaha badankood waxay helaan mushahaar sanadle ah oo kordho ( loona yaqaan **Steps**)
- Shaqaalaha qaarkood waxay heli karaan kordhinta mushahaar maadaama ay sii wataan waxbarashooda (oo loo yaqaan **Lanes**)
- Kharashka sannadlaha ah ee lacagta ku baxdo biilka nolosha (COLAs) waxaa ansixiyay Guddiga Waxbarashada taasoo qayb ka ah wadaxaajoodka heshiiska qandaraaska
- Qandaraasyo cusub oo saddex sano ah ayaa lala galay Shaqaalaha Nadiifinta, Macallimiin Kalkaalayaasha, Shaqaalaha Adeegyada Nafaqada, iyo Shaqaalaha Mashiinnada
- SPFS waxay hadda qandaraasyo cusub kala xaajoneysaa ururrada Saint Paul Federation of Educators (SPFE), Supervisors (SPSO) iyo Principals





# Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada

# Talo-bixintii Inooga Timid Dhankaaga

10,739  
Ka  
Qaybgalayaasha



## Bulshada SPPS waxay aad u qiimeeyaan:

- Ardayda oo si guud u dareenta **amni** (xag amniga jirka ah iyo xag fayyo-qabka shucuurta ah)
- Awoodda ardayda ee ah xulashada iyo helidda **fursado waxbarasho** oo ay ku faraxsan yihiin
- Codadka iyo aragtida ardayda oo qeyb ka ah **iskoolka** iyo go'aan qaadashada
- Ardaydu oo diyaar u ah waxbarashada dugsiga sare ka dib iyo/ama **shaqada xirfadaysan**
- Waxbarasho la iska dhex arki karo oo **tixgelineysa dhaqamada** ardayda
- Qaadashada shaqaale ka tarjumaya dhaqamada ardayda

## GU'GA 2023

- Kulamada ardayda ee ka dhacay 8 dugsigo sare oo SPPS ah
- Kulamada Bulshada ee Hay'adda Marnita's Table

## DAYRTA 2023

- Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada iyo Kulamada Miisaaniyadda
- Kulamada miisaaniyadda ee shaqaalaha
- Ra'yi-uruurin lagu ogaanayo waxyaalaha mudnaanta u leh (Qoysaska, Shaqaalaha, ardayda dhigato fasallada 6-12)

# Ammaanka Iskoolka

- Badi ardayda dugsiga sare ma aysan la kulmin rabshado xagga jirka ah
- Qoysasku waxay soo sheegay in inta badan ardayda qoyskooda aysan la kulmin wax rabshado xagga jirka ah
- Walaaca ugu weyn ee xagga amniga ee ay muujiyeen ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha waa hubka iyo weerarrada u dhexeeyo ardayda
- Ardaydu waxay soo sheegaan in musqulaha, hoolalka dheer ee la maro, iyo xilliga laga soo baxo iskoolka ay yihiin kuwa ugu sarreeyo xagga welwelka amniga la xiriiro
- Inta badan ardayda iyo shaqaalaha, oo ay ku jiraan maamulayaasha dugsiga, waxay taageeraan in iskoollada la keeno shaqaale sugo amniga

Natiijooyinka Ka  
Qaybgalka Kulamada  
Ammaanka Iskoolka ee  
Gu'ga 2023

**WADARTA KA  
QEYBGALAYAASHA =  
9,186**

# Ammaanka Iskoolka



- Nidaamka Baratakoolka Gurmadka ee La Cusbooneysiiyay
- Dugsi walba wuxuu leeyahay Qorshe ku aaddan Hawl-gallada Degdegga ah kuwaasoo u gooni ah iyaga iyo kooxda ammaanka iskoolka kuwaasoo hubiya in qorshahaas la raaco oo la cusbooneysiyo sannad walba
- Dhammaan dugsiyada sare, inta badan dugsiyada dhexe, iyo dugsiyada K-8 waxay leeyihiin shaqaalaha xiriirka ardayda iyo iskoolka ee Liaisons Support School (SSLs) oo ku sugan iskoolka
- Shaqaalaha SSL iyo Kooxda Amniga iyo Maareynta Arrimaha Degdegga ah ee degmada oo dhan waxay taageeraan dhammaan amniga iskoolada iyagoo weheshanaya Booliiska Saint Paul markii loo baahdo
- Waxaa dhammaan dugsiyada sare lagu daray warqadda dijitaalka ah ee lagu maro hoolka iyo kombiyuutarro xafiiska yaallo oo laga daabacdo warqadda lagu galo fasalka ka dib markuu ardaygu soo daaho
- Soo noqoshada basaska jaallaha ah oo adeegyo ka billaabaya afar dugsi sare (Harding, Central iyo Washington; Como oo basku soo noqonayo January 2024)

**Ku soo dir farriin magac la'aan ah app-ka Send a Tip**



# Dareenka ah inaad Qeyb ka tahay Bulshada & ka mid Noqoshada Iskoolka

- Macallimiinta, maamulayaasha iyo shaqaalaha taageerada waxbarashada waxaa loo tababaray sida loo aburo jowiyo taageero oo hormariyo **Waxbarashada Dareenka Shucuur iyo Bulsho (SEL)**
- **Kooxaha caafimaadka dhimirka:** La-taliyayaasha ardayga, shaqaalaha arrimaha bulshada, dhakhaatiirta cilmu-nafsiga ee iskoolka, shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa wax ka qabto arrimaha cakirma ee ardayda oo dhammaantood joogo iskool walba ayaa waxay taageeraan caafimaadka maskaxda iyo fayoobida ardayda
- **Meelo ardaygu isku dejiyo** oo loogu talagalay ardayda iyo shaqaalaha oo ka dhisan 30 iskool iyadoo lagu darayo wax badan sannadkan
- **Fursadaha tababarka iyo fayyo-qabka** oo loogu talagalay shaqaalaha si ay u taageeraan caafimaadkooda maskaxeed iyo fayyo-qabkooda

## Kooxaha Caafimaadka Dhimirka

\$40+ milyan lagu bixiyay

Waxaa ka mid ah ku dhowaad 550 shaqaale oo ku kala sugan degmada oo dhan.

### -KU SII DAR-

Rugaha caafimaadka ee Health Start Clinics oo ka furan 10 dugsi sare

Rugo bulshada oo nala shaqeeyo ayaa waxay taageeraan dhanka baahiyaha caafimaadka dhimirka iyo daroogada



# Dareenka ah inaad Qeyb ka tahay Bulshada & ka mid Noqo Iskoolka



- Dhammaan maamulayaasha dugsiga oo loo tababaray **hoggaaminta sinnaanta ee dadka kala jinsiga ah** iyo waxbarasho tixgelineysa dhaqamada ardayda
- **Fasalka Daraasaadka Qowmiyadaha** iyo shuruudaha looga qalinjebiyo
- iskoollada East African Magnet School, Txuj Ci HMong Language and Culture Schools
- Degmada oo dhan **fasallada luuqadaha ku baxo** ee Karen, Ojibwe, Hmong, Japan
- Quseeyo **xeerarka**geedaha dhaqan ee la shido iyo nooca dharka la xirto
- **Shaqaalaysiinta macallimiinta iyo xagsashada shaqaalaha**
  - barnaamijka Saint Paul Urban Teacher Residency (SUTR)
  - 12% ah macallimiin dheeraad ah oo kuwa midabka leh ah oo la qortay 2023 taasoo ka duwan 2021
  - Heerka xagsashada macallimiinta midabka leh ee sannad-dugsiyeedkan waa 69%

# U Diyaargarowga Kolleejada & Shaqada

## DUGSIGA HOOSE

- La-taliyayaashu waxay bixiyaan duruus ku saabsan xirfadaha tacliinta, shaqada xirfadaysan, & dareenka xag shucuur iyo xag bulsho ee dhammaan ardayda
- Dhammaan ardayda waxay sameystaan Qorshaha Waxbarashada Shakhsiyeed kaasoo billaabnaya kindergarten (Xello)
- Waxay ardayda fasallada 5aad u diyaariyaan dugsiga dhexe

## DUGSIGA DHEXE

- Fasalka aasaasiga ah ee ay qaataan ardayda oo dhan
- Duruusta aqoonta dhaqaalaha, safar gaaban oo lagu tago Finance Park
- Duruusta fasalka ee qiyamka, ka hortagga handadaadda, qaababka waxbarashada, sahaminta shaqooyinka xirfadaysan, u doodista nafta ardayga
- Waxay ardayda u diyaariyaan u gudubka dugsiga sare
- Talooyin shakhsi ah oo ku saabsan qorsheynta shaqooyinka xirfadaysan



# U Diyaargarowga Kolleejada & Shaqada

## DUGSI SARE

### Fursadaha helidda dhibcaha kolleejka

- Koorsooyinka International Baccalaureate iyo Advanced Placement
- Fursadaha isdiwaangelinta oo isku mar laba meel laga qaato koorsooyinka PSEO, College in the Schools (CIS)

### Dejinta qorshaha dugsiga sare ka dib

- Hagaha xulashada koorsada
- Tababarka shaqo iyo sahaminta shaqada xirfadeysan
- Caawinta arjiga kolleejada
- **CUSUB** Barnaamijka Minnesota Direct Admissions Program


### Dhabbada Shaqada Xirfadeysan

- Koorsooyinka shaqooyin aad baahi loogu qabo, lehna mushahar sare ee ka baxo dhammaan dugsiyada sare
- Tababarka Career & Technical Education (CTE)
- Khibradaha farsamo ee shaqooyinka loo badan yahay
- Shahaadooyinka laga aqoonsan yahay goobaha shaqada
- 3M Advanced Training Center ee ardayda si ay u helaan xirfado shaqo oo dhab ah
- 3DE **CUSUB** oo ka baxayo Como iyo Washington (laga billaabo 2024-25)



# Guusha Waxbarasho


## Graduation Rate



Bartilmaameedka heerka qalin-jabinta ardayga ee 4 sano: **87%**

### AKHRISKA MCA


(Degmadoo dhan, fasallada 3-8 iyo 10)



33.9% oo ku fiican guud ahaan

### XISAABTA MCA


(Degmadoo dhan, fasallada 3-8 iyo 11)



25.6% oo ku fiican guud ahaan

### XISAABTA MCA

(Degmadoo dhan, fasallada 5, 8 iyo Dugsiga Sare)



23.9% oo ku fiican guud ahaan

# Guusha Waxbarasho

Lix Isbeddel Oo ku Yimid Waxbarashada Dugsiga Hoose



- 1 Waxbaridda Koox Yar
- 2 Dhawaaqa iyo Barashada Ereyada
- 3 Wax su'aalidda ardayga xilliga akhriska--fiiri waxa qoran
- 4 Waxakhris wax la isla Akhrinayo (REad Alouds)
- 5 Qoraal
- 6 Waxbarasho Ardaygu u Madax-bannaan yahay



**WINN (Waxa aan hadda u baahanahay)**

Duruusta waxakhriska kooxaha yar ee dugsiyada hoose iyo dhexe

# Guusha Waxbarasho

\$10.5 milyan  
lagu bixiyay

## Manhajka Xisaabta ee Dugsiga Hoose (Fasallada K-5)



- Kula kulan ardayda heerka ay joogaan aqoon ahaan
- **Xogo wax laga qaban karo** oo durba muujinayo farqiga xirfadeed ee ardayda
- **Ciyaaraha xisaabta** oo xoojinaya xirfadaha aasaasiga ah
- **Imtixaanno yar oo xagga xirfadda ah** oo lagu hubsado fahanka ardayga

## Manhajka Xisaabta ee Dugsiga Sare (Fasallada 6-12)



### Fasallada 6-8

- Waxbarasho ku salaysan su'aalaha qoran ee xisaabta
- Waxbarasho muuqaal wadata
- Qiimeynta ardayda & kala duwidda duruusta

### Fasallada 9 ilaa 12

- Waxay taageertaa taxanaha xisaabta cusub ee manhajka Integrated Math
- Manhaj dhaqan ahaan ardayda maanka ku hayo
- Caawinta SuccessMaker


# Caqabadaha ina Hor Yaalla

Qorshaha istiraatiijiyadeed Canshuuraha dhismayaasha  
Isdiwaangelinta oo yaraaneysa Dhammaadka deeqda ARR  
Guusha waxbarasho Qandaraasyada shaqaalaha  
Waxyaalaha mudnaanta u leh bulshada Deeqda gobolka



## Dheellitirka Miisaaniyadda Sannad-Maaliyadeedka 2025

# Tallaabooyinka Xiga ee Miisaaniyadda & Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada



Nagula wadaag taladaada [spps.org/FY25budget](https://spps.org/FY25budget)





# Su'aalao & Jawaabo